WASH Cluster
Water Sanitation Hygiene

Dhabbe-tusayaasha loogu talogalay Biyaha, Fayodhawrka, Nadaafadda ee Xarumaha Daaweynta Daacuun Caloolaha

Maxaaradda Caafimaadka
Ministry of Health
Human Service of Somali Fed. Republic
& Daryeelka Bulshada ee JFS

Dr. Abdullahi Hashi Ali

GENERAL DIRECTOR

MINISTRY OF HEALTH FEDERAL GOVERNEMNT OF SOMALIA

Dhabbe-tusayaasha loogu talogalay Biyaha, Fayodhawrka, Nadaafadda ee Xarumaha Daaweynta Daacuun Caloolaha

Marka uu dillaaco cudurka daacuun caloolaha, bukaannada badankood waxaa lagu daaweyn karaa xarumaha caafimaadka ee hadda jira. Hase-yeeshee, saraakiisha caafimaadka waxaa ay go'aansan karaa in ay ka dhisaan Xarunta Daaweynta Daacuun Caloolaha (CTC) oo aan joogto ahayn qayb ka mid ah xarunta hadda jirta ama meelo gooni ah.

Sida loo doorto/xusho goobta loogu talogalay xarunta daaweynta daacuun caloolaha (CTC)

Xarumaha Daaweynta Daacuun Caloolaha waa in ay ku yaallaan meel:

1. Bukaannada ay si fudud ku gaari karaan xarunta
2. Ka fog ilaha biyaha iyo xarumaha shaqeynaya (tus, dugsiyada/iskoolaadka, suuqyada, meelaha daawooyinka laga bixiyo)
3. Ka baxsan qaybaha kale ee bukaannada, haddii ay ku yaallaan gudaha xarunta daryeelka caafimaad ee hadda jirta
4. Fudud in la nadiifiyo



Kontaroolka Caabuqa/Infekshanka

Barta Ka-galidda/Ka-bixidda

- Barta ka-galidda/ka-bixidda waxaa la dhigayaa baaf lugaha la gashto ama waxaa la doorbidayaa in waardiye haysta qalab buufis ah laga shaqaaleysiiyo in uu buufiyo ka-dibna jeermiska ka dilo cagaha. Buufinta ama baafka lugaha la gashto waxaa ay sidoo kale leeyihiin ujeeddo ah in laga dhigo shaqaalaha iyo dadka soo booqda in ay ogaadaan wasakhda/fadaraysan suurtagalka ah in ay keenaan meelaha kala duwan.
- Haddii baafafka lugaha la gashto la dhigo, waa in ay noqdaan baafaf ku dhex jira dhar ama usbuunyo lagu qooyey milan/qoosh 0.2 koloriin ah waana in la beddelo laba jeer maalintii ama marka dharku ay u muuqdaan in ay yihiin kuwo wasakheysan.
- Waa muhiim in la ogaado ka-dib diyaarinta milanka/qooshta koloriinta, haraaga kalshiyamta (*calcium*) ah ee ku hara salka weelka ay tahay in aan lagu adeegsan weelasha wax lagu buufiyo, iyada oo ay tani keeni karto in ay marinnada istaagaan/xirmaan. Haamaha caaga ah ee wax lagu buufiyo ee iska caabin kara koloriin si xoogan isugu ururtay waa in la adeegsado. Ha isticmaalin haamaha wax lagu buufiyo ee birta ka sameysan ee loo adeegsado ololayaasha buufinta haraaga gudaha ku haray (tus, kuwa leh calaamadda Hudson ama Sumitomo)

Kontaroolka Caabuqa/Infekshanka

Diiwaangelinta/dhigidda

- Bukaannada iyo daryeelayaasha waa in ay galaan iyaga oo soo maraya goobta bukaanka uu ka soo galo halkaas oo cagahooda iyo kabahoodaba looga soo dili doona jeermiska milan/qoosh koloriin 0.2% ah iyada oo la adeegsanayo haamaha buufiska sida la doorbidayo, ama baafka lugaha la gashto.
- Dhammaan dadka galaya ama ka baxaya waxaa ay u baahan doonaan in ay gacmahooda ku dhaqaan milan/qoosh koloriin 0.05% ah.
- Jeermiska ka dil gaadiidka bukaanka: milan/qoosh 0.05% loogu talogalay sariiraha iyo bareelleyaasha ama 0.2% loogu talogalay baabuurta/gawaarida.
- Ku dhaq dharka bukaanka iyo daryeeleyaasha milan/qoosh 0.05% ah ilaa 30 daqiiqo, ka-dibna biyo raaci biyo nadiif ah kadibna ku qalaji qorraxda. Usheeg daryeelayaasha in aysan ku dhaqin dharkooda jeermiska sida/leh meel u dhow ilaha biyaha sida durdurrada webiyada iyo/ama ceelasha.
- Xaddid oo xakamee dhaqdhaqaaqa lagu galayo iyo kuwa gudaha qaybaha sida ugu badan ee suurtagalka ah.
- Ku xaddid ogolaanshaha galitaanka iyo daryeelka hal daryeelle bukaan kasta.

Inta Lagu Guda Jiro Daryeelka Cusbitaalka

- Ku dhaqo gacmaha saabuun ama milan/qoosh koloriin 0.05% ah ka hor iyo ka-dib marka aad eegto bukaan kasta.
- Gacmo-gashi waa in loo diyaariyo kuwa taabanaya dhiigga, koloriinta iyo milanka/qooshta koloriinta leh.
- Jeermiska ka dil hoyga, sarriiraha, iyo dhulka ugu yaraan laba jeer maalintii adiga oo adeegsanaya milan 0.2% ah.
- Jeermiska ka dil musqullaha qubeyska, kuwa xaajada/saxarada, iyo meelaha dharka lagu dhaqdo adiga oo adeegsanaya milan/qoosh 0.2% ah.
- Astur saxarada bukaannada ee lagu ururiyay baaldiyada adiga oo ku darayo 1sm oo milan/qoosh koloriin 2% ka-dibna ku shubaya musqullaha.
- Ku dhaq oo jeermiska uga dil milan/qoosh 0.05% ah dharka iyo go'ayaasha/gogosha sariirta bukaannada daacuun caloolaha si joogto ah oo ka gooni ah dharka kale.
- Haddii daryeeleyaasha ay cunto siinayaan bukaannada hubi in dhammaan macuunta cuntada lagu karsado lagu dhaqo milan koloriin 0.2% ah.

Xilliga Ka-bixidda Xarunta/Cusbitaalka

- Hubso in qof kasta uu aqoon aasaasi ah u leeyahay cudurka daacuun caloolaha iyo in uu ka warqabo tallaabooyinka nadaafadda si uu u dhawro qoyskiisa/qoyskeeda. (Bukaannada cusbitaalka ama xarunta laga soo saarey waxaa weli suurtagal ah in ay sii gudbiyaan cudurka daacuun caloolaha tiro yar oo maalmo ah gudahooda haddii nadaafadda aasaasiga ah aanan la raacin/ixtiraamin)
- Waxaad siisaa qofka saabuun iyo koloriin (xirmada ka-bixidda xarunta/cusbitaalka).

Aaska (Duugta)

- Markii qof dhinto, ugu dhaq meydka qofka dhintay milan/qoosh 2% ah meel loo diyaariyay ama loogu talogalay, waxaad ku dabooshaa/xirtaa daloolada meydka suuf koloriin 2% ah leh, waxaadna ku duubtaa meydka go' ama geli bacda meydka, haddii la heli karo.
- Sida ugu dhaqsaha badan waa in loo aaso meydka.

Waxbarashada Caafimaadka iyo Nadaafadda
Shaqaalaha caafimaadka bulshada iyo shaqaalaha xirfadda waa in ay siiyaan daryeeleyaasha iyo bukaannada tababar ku saabsan waxyaalaha aasaasiga ah ee cudurka daacuun caloolaha, oo ay ka mid yihiin dariiqyada isu-gudbinta caamka ah iyo siyaabaha uu qofka isaga difaaci karo ama ilaalin karo

Biyaha, Nadaafadda, iyo Fayodhawrka

BIYAHA

Biyo gaarsiin/keenidda

Bukaannada: Qiyaastii 30-60 litir oo biyo daaweysan ah ayaa bukaankiiba maalin kasta loogu baahan yahay oo loogu talogalay cabbidda, nadaafadda, qubeyska, iyo dhar dhaqid.

- Daryeeleyaasha: Ku dhowaad 5 litir oo biyo daaweysan ah ayaa daryeele kasta maalin kasta loogu baahan yahay.
- Hubso weelal si cad loogu calaamadeeyay ORS in laga heli karo dhammaan qaybaha xarunta caafimaadka.
- Hubso in biyo kaafi ah oo dadka ku filan in la kaydiyey (la doorbido kayd 4 maalmood ah)

Tayada biyaha

- Dhammaan biyaha la cabbo iyo biyaha loogu talogalay quudashada (ORS) ee gudaha Xarunta Daaweynta Cudurka Daacuun Caloolaha waa in lagu daro koloriin si ay u bixiyaan haraa ah 0.5 mg/l ama 0.5-1 mg/l halka pH ay tahay ≥8
- Biyaha waxaa keliya si wax-ku-ool ah loogu dari karaa koloriin haddii saafinimadooda (uurrada dareeraha) ay tahay <20 Halbeegyada Saafinimada Nephelometric/*Nephelometric Turbidity Units (NTU)*
- Qaddarka koloriinta bukaan kasta ee maalin kasta loogu talogalay baahiyada oo dhan (oo ay ka mid yihiin kaydka/diyaargarowga) qiyaastii waa 100 g ee HTH/bunaankii/maalintii.

Kaydka biyaha la cabbo

- Biyaha la cabbo iyo milanka fuuqcelinta (ORS) waa in loo kaydiyo si ka gooni ah biyaha loogu talogalay isticmaalada kale waana in laga dhigo kuwo ay si fudud ku heli karaan bukaannada iyo daryeelayaasha
- Biyaha la cabbo iyo milanka fuuqcelinta (ORS) waa in lagu kaydiyo weelal daboolan oo si cad u calaamadeysan, biyaha waa in lagaga soo shubo weelka khasabad ama tuubbo

Kaydka milanka koloriinta

- Keliya hal qof waa in uu xilli shaqo/kaltan shaqo kasta uu mas'uul ka ahaado diyaarinta milanka koloriinta kala duwan.
- Inta badan weelal 125 litir qaad ah oo leh khasabad/tuubbo ayaa loo adeegsadaa in lagu diyaariyo milanka (sida la doorbido laba fuusto/hamood oo loogu talogalay milan kasta). Kuwan waa in si cad loogu calaamadeeyo milanka loo adeegsadey, si looga fogaado shilal.
- Weelal ama baaldiyo midabo kala duwan leh ayaa sidoo kale la isticmaali karaa si dadka loo dareensiiyo ama dhinaca ahaanshaha kala duwan.

Nadaafadda

Waxbarasho ku saabsan nadaafadda waa in loo fidiyo dhammaan shaqaalaha caafimaadka ka shaqeeya iyo kuwa aan ka shaqeynba si qof kasta loogu wargeliyo ama uu ugu warqabo sharciyada la xiriira nadaafadda iyo khataraha ay leeyihiin in loo hoggaansami waayo.

Sare-u-qaadidda/xayaysiinta waa in ay xoogga saarto:

- Gacmo dhaqashada ka-dib la-tacaalidda bukaan kasta ama ka-dib gacan ku qabashada agab fadaraysan
- Gacmo dhaqashada waqtiyada muhiimka ah (ka-dib isticmaalka musqusha, ka hor cunto diyaarinta ama cunto cunidda)

- Xirashada dhar kaa difaaci kara marka aad galeyso goobta. Marka aad ka tagayso goobta dharka kaa difaaci kara waa in aan loo qaadan guriga.
- Nadaafadda jikada/cuntada (Keliya shaqaalaha jikada waa in loo oggolaadaa aagga jikada)

Dharka (lebbiska) badbaadada

Dhammaan shaqaalaha ka shaqeynaya xarunta waa in ay heli karaan dharka (lebbiska) badbaadada, oo ay ka mid yihiin kabaha buutka iyo dhar badbaado oo si fudud la isaga bixin karo ka hor inta aan laga tagin xarunta. Gacmo-gashiyo waa in ay sidoo kale heli karaan kuwa ka shaqeeya ama maamula dhiigga, waxyaabaha jirka soo saaro, koloriinta, iyo milanka/qooshta koloriinta.

Nadaafadda cuntada

Xarumaha daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTCs) ama xarumaha caafimaadka jikooyinka leh, xeerar adag waa in loo dejiyaa diyaarinta iyo bixinta cuntada oo ay ka mid yihiin:

- Marka la galo jikada (waqti kasta), gacmaha waa in lagu dhaqdo milan koloriin 0.05% ah.
- Cuntada waa in la kaydiyo sidaa awgeed waxaa maamulaya keliya shaqaalaha jikada.
- Keliya shaqaalaha jikada ayaa loo oggol yahay gudaha jikada.
- Keliya shaqaalaha jikada waa in ay bixiyaan cuntada/raashiinka.
- Jeermiska ka dil saxamaha, mindiyaha, qaandooyinka iyo fargeetooyinka adiga oo ku qoynaya 5 daqiiqo baaf oo ay ka buuxaan milan koloriin 0.2% ah.
- Cuntada ay bixiyaan qaraabada waa in la maareeyo iyada oo la raacayo jaangoyn nadaafadeed oo la mid ah.

Dhar dhaqidda

Goobta dharka lagu dhaqo waa in ay ku taallo meel u dhow goobta soosaareysa wasakhda ugu fadaraysan; agabka wasakhaysan ee ka yimaada xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha oo dhan oo ay ka mid yihiin bustooyinka, dharka bukaanka/takhtarka, iyo dharka badbaadada waa in la dhaqo. Baafaf caag ah oo waaweyn ayaa loo adeegsan karaa dhar dhaqidda.

- Gogosha sariiraha ee wasakheysan iyo dharka waa in la geeyo goobta dhar dhaqidda ka-dibna waa in lagu dhaqo milan koloriin 0.05% ah.
- Haddii koloriin aan la heli karin, gogosha bukaanka iyo dharka waxaa jeermiska laga dili karaa iyada oo 5 daqiiqo lagu walaaqayo biyo karkaraya ka-dibna lagu qalajinayo si toos ah iftiinka qorraxda.
- Gogosha sariiraha waxaa sidoo kale jeermiska laga dili karaa iyada oo lagu dhaqayo saabuun oo si fiicana loogu qalajinayo iftiinka qorraxda ee tooska ah. (waxaa lagu talinayaa in aan lagu adeegsan joodari/firaash xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha maadaama ay adag tahay in la nadiifiyo)
- Si loo yareeyo wasakhda goobta dharka lagu dhaqo, dharka bukaanka iyo agabka kale waxaa jeermiska laga dili karaa iyaga oo lagu qalajinayo qorraxda ka hor inta aan la dhaqin.

Nadiifinta xarunta

- Saqxadda xarunta waa in laga sameeyo shub ama lagu daboolo caag fidsan si loo helo nadiifin fudud. Isticmaal xaaqinka dhulka lagu masaxo ee la majuujiyo ama qalab la mid ah oo leh milan koloriin 0.2% ah si aad jeermiska uga disho saqxadaha qaybta xarunta caafimaadka/ cusbitaalka ilaa afar jeer maalintii. Ku buufi sariiraha cudurka daacuun caloolaha milan koloriin 0.2% ah, sida ku habboon, iyo inta u dhaxeysa bukaannada la seexiyo.
- Ku nadiifi musqullaha dhawr jeer maalintii milan koloriin 0.2% ah adiga oo adeegsanaya xaaqimo iyo/ama ku buufinaya. Tani waxaa ka mid ah dhagaxaanta lagu kaloobsado ee musqusha, albaabka, gacanka albaabka iyo derbiyada ilaa 1 mitir (ama dhererka firidhka). Koloriin dheeraad ah looma baahna in lagu shubo musqusha gudaheeda.

Nadiifinta gaariga gurmadka degdegga ah (Ambalaaska)/baabuurka

Gaariga lagu qaado bukaannada waa ay shaqaalaha ku nadiifiyaan milan koloriin 0.05% ah.

TAS-HIILAADKA FAYODHAWRKA

Qubeyska

- Waa in ay jirto goob lagu qubeysto oo yaalla baaldi qubeys oo loogu talogalay 50 qof kasta (lab iyo dheddig). Qubeyska lagu qubeysto baaldiga ayaa la doorbidaa si loo yareeyo xaddiga biyaha ee la isticmaalo
- Waa in ay jiraan ugu yaraan laba qol oo lagu qubeysto (lab iyo dheddig) oo loogu talogalay shaqaalaha jooga goobaha dhexdhexaadka ah.

Goobaha lagu qubeysto waa in lagu xiriiriyo god saara biyaha wasakhda ah oo ku yaalla gudaha xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha. Godadka biyo-saaridda (ee carradu badankeeda) waa in ay ku yaallaan ugu yaraan 30 mitir meel u jirta il-biyood kasta ee dhulka ah salka musqul kastana waa in uu u jiraa ugu yaraan 1.5 mitir heerka biyaha dhulka. Qalab miira ama sifeeya dufanka waa in la tixgeliyaa halka saabuun lagu isticmaalo ama marka xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha ay u badan tahay in ay furnaato muddo dheer. Goobaha uu ku qubeysto bukaanka waa inay qaadi karto ugu yaraan laba qof (daryeele iyo bukaan).

Goobta gacmaha lagu dhaqdo

Tas-hiilaadyo gacmaha lagu dhaqdo oo leh milan koloriin 0.05 ah waa in lagu diyaariyo dhammaan musqullaha, dhammaan teendhooyinka (bukaanka iyo maamulka), jikada, qolka meydka, goobta qashinka

- Saabuun looma baahno marka milan koloriin 0.05% la adeegsado.
- Godadka biyo-saaridda waa in ay ku yaallaan ugu yaraan meel 30 mitir u jirto il-biyoodka dhulka ah salka musqul kastana waa in ay ugu yaraan ka sarreeyaan 1.5 mitir heerka biyaha dhulka.
- Dhammaan shaqaalaha, bukaannada iyo daryeeleyaasha iyo dadka soo booqanayaba waxaa ay leeyihiin tas-hiilaad loogu talogalay in ay ku dhaqdaan gacmahooda oo muuqda kuwaas oo habboon.

- Dhammaan bukaannada, daryeelleyaasha, iyo dadka soo booqanayaba waxaa la baraa oo lagu dhiirrigeliyaa in ay dhaqaan gacmahooda.
- Dhammaan shaqaalaha waa in ay dhaqaan gacmahooda ka hor iyo kadib marka ay eegan bukaannada
- Shaqaalaha iyo bukaannada waa in ay dhaqaan gacamahooda marka ay ka baxayaan musqullaha iyo goobaha daaweynta ama xarunta daaweynta cudurka daacuunka (CTC)

Musqullaha

Waa in ay jirto hal musqul oo loogu talogalay 20 qofood kasta oo la dhawrayo, iyo hal musqul oo loogu talogalay 50 bukaanno kasta ee cusbitaalka/xarunta la dhigay (badankooda ma isticmaali doonaan) oo lagu darey hal ama laba ku yaalla goobta dhexdhexaadka ah shaqaalaha.

- Dhammaan wasakhda aadanaha ee dareeraha ah waxaa lagu shubaa/asturaa musqusha, ama waa la aasaa (duugaa).
- Godadka biyo-saaridda (ee carradu badankeeda) waa in ay ku yaallaan ugu yaraan 30 mitir meel u jirta il-biyood kasta ee dhulka ah salka musqul kastana waa in uu u jiraa ugu yaraan 1.5 mitir heerka biyaha dhulka.
- Wasakhda xoogaa adag waa la gubaa halka ay suurtagal tahay.
- Halka lagu kaloobsado musqullaha ee caaga ah waxaa ay waxtar u leedahay xaaladaha degdegga ah sababta oo ah rakibaadooda waa kuwo dhaqso ah waa ayna sahlan tahay in la nadiifiyo.
- Musqullaha waa in ay noqdaan kuwo madax-bannaan oo aan ku xirnayn nidaamka bullaacadda ee aasaasiga ah,
- Marka musqullaha ay buuxaan (0.5 m ee dusha sare) musqullo cusub waa in la qodo. Musqullihii hore waa in lagu daboolo ciid waana in laga dhigo kuwo aysan gaari karin xayawaanka qashinka ka qaraabta (jiirka, iwm)

Baaldiyo loogu talogalay sariiraha bukaannada cudurka daacuun caloolaha

Maxaa yeelay in badan oo ka mid ah bukaannada cusbitaalka la dhigo ma awoodi doonaan in ay isticmaalaan musqusha, baaldiyo (10-15 litir qaad ah) waa in la dhigo hoosta godka sariirta bukaanka daacuunka caloolaha qaba iyo sariirta dhinaceeda oo loogu talogalay matagid. Baaldiga waxaa kor loogu qaadi karaa iyada oo la saarayo damal/dhagax si looga hortago in ay wasakhdu ku firidho degaanka ku hareeraysan. Tiro baaldiyo ah waa in sidoo kale lagu diyaariyo Goobta dhawrista/ilaalinta. Qiyaastii 1 sm oo koloriin 2% ah waa in lagu shubo baaldiga ka hor inta aan la dhigin sariirta hoosteeda. Baaldiga waa in lagu soo faarujiyo musqullaha u dhow goobta ee ay isticmaalaan bukaannada cudurka daacuun caloolaha.

MAAREYNTA QASHINKA/WASAKHDA

Kala-qaybinta iyo kaydinta

Waa in aysan xarunta dibadda uga bixin wasakhda laga soosaarey xarunta daaweynta cudurka daacuunka caloolaha (CTC).

Noocyo kala duwan oo wasakh ah ayaa laga soosaaraa xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTC) oo u baahan in loo asturo si sax ah si loo yareeyo isu gudbinta cudurka

daacuun caloolaha iyo cudurada kale ee la xiriira wasakhda caafimaadka. Wasakhda waxaa loo qaybin karaa saddex qaybood ujeeddooyin kala-soocid iyo asturid:

- Waxyaallo jilicsan: suuf, faashad, bacaha, saliingiyaasha, waraaqaha (wasakhda – fadaraysan ama aan fadaraysnayn ee la gubi karo)
- Waxyaallo orgaanik ah/la xiriira noole: haraaga cuntada, nudaha aadanaha (wasakhda aan la gubi karin)
- Waxyaallo afaf fiiqan/mudacyo: irbado, gaalleef/mindida qalliinka, qaruurado, dhalo (wasakhda keeni karta dhaawac ka-dibna cudur laga qaadi karo haddii aan si habboon loo asturin)

Goobta/soonaha wasakhda

Goobta/soonaha wasakhda waxaa laga qorsheeyaa gudaha xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha waxayna ka kooban tahay:

- Fuusto wasakhda lagu gubo (oo leh goob qalalan oo lagu kaydiyo baaldiyada qashinka lagu rido) – si loo gubo wasakhda jilicsan
- God waxyaabaha ogaanika ah lagu rido (oo leh dabool si looga ilaaliyo dukhsiga/kaneecada)-wasakhda ogaanika ah iyo dambaska ka dhasha weelka qashinka lagu gubo. Hubi in gaarista godku ay xaddidan tahay.
- Godka waxyaallaha afafka fiiqan/mudacyada oo loogu talogalay in lagu shubo irbadaha, gaalleef/mindida qalliinka, qaruuradaha ku jira weelasha lagu aruriyo.
- Marka la xiro xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTC), godka ogaanika waa in dib loo buuxiyo oo waxyaallaha afafka fiiqan leh laga buuxiyaa shub ama waxyaabo la mid ah si ay u daboolaan waxyaallaha afafka fiiqan si loo ilaaliyo dadka mustaqbalka isticmaalaya dhulka.

Biyaha wasakhda ah

Biyaha wasakhda ah ee ugu fadaraysan/wasakhaysan waxaa ay ka imaan doonaan qolka meydka, musqullaha qubeyska, goobta dhar-dhaqa, iyo goobta lagu dhaqo alaabta ee jikada. Biyaha wasakhda ah ee ka imaada goobahan, waxaa sidaa darteed, lagu asturi karaa godadka biyo-saaridda sida suurtagalka ah ka-dib marka ay soo maraan qalabka dufanka biyaha ka saara (sidaa awgeed godka biyo-saaridda ma noqonaya mid xiran). Godadka biyo-saaridda waa in ay ku yaallaan ugu yaraan 30 mitir meel u jirta il-biyood kasta ee dhulka ah salka musqul kastana waa in uu u jiraa ugu yaraan 1.5 mitir heerka biyaha dhulka.

Goobta biyo-saaridda

Dhuumo ama togog qaada biyaha waa in laga dhiso hareeraha bannaanka mid kasta ee ah dhismeyaasha xarunta si ay u maraan biyaha roobka oo ayna uga baxaan xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTC). Inkasta oo qulqulka biyaha roobka laga yaabo in ay ku jiraan xoogaa fadarayn ah, waxaa loo tixgeliyaa in ay halistoodu yar tahay. Haddii aysan macquul ahayn in dhammaan biyaha roobka laga saaro xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTC) qabanqaabo waa in la sameeyaa oo ah sidii looga dhaamin lahaa biyaha roobka xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha ka-dibna

dibadda loogu saari lahaa, halka ay suurtagal tahay, biyo-saaridda/bullaacad hadda jirta.

Qabashada Meydadka Bukaannada u Dhintey Cudurka Daacuun Caloolaha

Meydadka bukaannada u dhintey cudurka daacuun caloolaha waa in jeermiska looga dilaa milan koloriin 2% ah. Dadka dhaqa ee diyaariya meydka bukaanka u dhintey cudurka daacuun caloolaha waa in uu:

- Xirtaa gacmo-gashiyo, dufan-dhowr, iyo weji-xir/maaskaraato.
- Ku nadiifiyaa meydka milan koloriin gudaha qolka meykda isaga oo isticmaalaya milan koloriin 2% ah.
- Ku buuxiyaa afka iyo futada meydka suuf lagu qooyey milan koloriin 2% sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah.
- Faashad ku xiraa madaxa meydka si uu u sii ahaado afkiisa mid xiran.
- Faaruji mindhiciirada/xiidmaha.
- Halka ay tahay in meydad badan lagu kaydiyo, nuuriyo (kalshiyam oksaydh, CaO) ayaa loo adeegsan karaa in lagu qalajiyo oo lagu dhexdhexaadiyo dareeraha si loo yareeyo urta ka soo baxda.

Haddii ay suurtagal tahay, istaabashada jireed ee u dhaxeeya qoyska iyo meydka waa in laga hortagaa. Haddii tani ay suurtagal noqon weydo, qoyska waa in lagu wargeliyaa baahida loo qabo:

- In gacmaha lagu dhaqdo saabuun iyo biyo socda ka-dib marka ay taabtaan jirka.
- Ka fogaaw in gacmaha aad saarto afkaaga ka-dib taabashada meydka.
- Jeermiska ka dil dharka iyo gogosha bukaanka dhintey adiga oo ku walaaqaya biyo karkaraya ilaa 5 daqiiqo ama adiga oo si fiican ugu qalajinaya qorraxda iyo ka-dib dhaqitaanka caadiga ah.
- Ka fogaaw in aad la dhafarto/aad ag fadhiisato meydka.
- Ku tali in meydka loo aaso si dhaqso ah.
- Xubnaha qoyska ee qabta meydka waa in aysan cunto diyaarin 24 saacadood.

Qaadista meydka

- Dadka qaadaya meydka waa in ay xirtaan gacmo-gashiyo.
- Meydka waa in si taxaddar leh loo duuduubo.
- Meydka waa in sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah loo geeyo qolka meydka sababta oo ah dheecaan ayaa bilaabanaya in uu ka soo baxo meydka.
- Halka bacaha meydka laga heli karo, waa in loo adeegsado qaadista meydka si loo soo aaso. Haddii aan la heli karin, meydka waxaa lagu duuduubi karaa go’ lagu qooyey koloriin 2% ah.

Qolka meydka

Qolka meykda waa in uu ku dhinac yaallaa goobta/soonaha wasakhda. Teendho xiran (caag ah, waxyaallo kale) waa in loo qoondeeyaa meydadka dadka dhintey si looga hortago gaarista meydadka. Qaab-dhismeedka qolka meydka waa in uu suurtageliyo

nadiifin gudaha ah oo wax-ku-ool ah, kanaalada biyo-saaridda ee ku qulqula godadka biyo-saarka (dheecaanada meydka waxaa ay u badan tahay in ay aad u fadaraysan yihiin). Waa in uu ku leeyahay gudaha xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha iyo meel laga baxo si uu u dardargeliyo in meydka la qaado. Haddii xarunta daaweynta cudurka daacuun caloolaha (CTC) aysan awoodin in ay dhisto qolka meydka, in meydka si dhaqso leh loo aaso ayaa lagu talinayaa. Meydka waa in la diyaariyo iyada oo la raacayo qoddobada kor ku xusan.

SIDA LOO SAMEEYO MILANKA KOLORIINTA			
	0.05%	0.2%	2%
HTH (70% koloriin firfircoon)	1 qaaddada miiska ah ayaa lagu darayaa 20 litir oo biyo ah	1 qaaddada miiska ah ayaa lagu darayaa 5 litir oo biyo ah	2 qaaddada miiska ah ayaa lagu darayaa 1 litir oo biyo ah
Warankiilo	14 qaaddada miiska ah ayaa lagu darayaa 20 litir oo biyo ah ama ½ koob ayaa lagu darayaa 20 liti oo biyo ah	20 qaaddada miiska ah ayaa lagu darayaa 5 litir oo biyo ah	2 koob ayaa lagu darayaa ha litir
Isticmaalka	In lagu dhaqdo gacamaha iyo dharka (ku qoy 15 daqiiqo) Jeermis ka dilidda maqaarka Isticmaal 24 saacadooc gudahooda	Jeermis ka dilidda sariiraha saqxadda dhulka, musqullaha agabka jikooniga ee bukaanka iwm. Isticmaal 3 maalmooc gudahooda, Ku isticmaa gacmo-gashiyo	Jeermis-ka-dilidda mataga iyo saxarada, jeermis ka dilidda meydadka, (ku nadiifi ama ku buufi milankan ka ho xafiisyada ugu dambeeyay) Ku isticmaal gacmo-gashiyo
Ogow: hal koob waa 200mil, hal qaaddana waa10ml			

9.7. Shaxda Baahiyada Biyaha, Nadaafadda iyo Fayodhawrka ee Xarunta Daaweynta Cudurka Daacuun Caloolalaha leh 100 Sariirood (160 bukaan)

30 bukaan oo la Dhawrayo, 100-bukaan oo Xarunta La Dhigay, 30 oo Bogsanaya, 1 daryeelle/bukaan (160)

Xarumaha	Goobta 1aad e Bukaanka Baarista Dhawrista	Goobta 2aa ee Bukaanka Dhigidda Xarunta Go'doomin	Goobta 3aad e Bukaanka Bogsashada	Goobta Dhexdexaadka	Qolka Meydka	Goobta/ Soonaha Wasakhda	Wadarta
Biyaha							
Weelal loog talogalay biyaha la cabb (sida caadig ah weel 125 qaad)	2 (1/ teendho)	5 (1/ teendho)	2 (1/ teendho)	1 (1/ teendh loogu talogala shaqaalaha)			10
Weelasha OR (sida caadig ah weel 125 qaad)	2 (1/ teendho)	5 (1/ teendho)	2 (1/ teendho)				9
Qasabado (keenaya biy la cabbo)	1 (musqush qubeyska)	2 (dhar-dhaqa, musqusha qubeyska)	1 (musqush qubeyska)	1 (jikada)			5
Mugga kaydk (sida caadig ah haamah la buufi karo)				28.8 m^3 (2x15 m^3)			
Qubeysashada							
Musqullaha qubeyska (ug yaraan 2, ragga iyo dumarka)	2	4	2	2 (loogu talogalay shaqaalaha)			10
Nadaafadda							
Weelal loog talogalay gacmo-dhaqa oo ku jira mila koloriin 0.05% ah (sid caadiga a weel 125 qaad)	4 (iridda, goobta musqusha + 1 teendho)	7 (iridda, goobta musqusha + 1/ teendho)	4 (iridda, goobta musqusha + 1/ teendho)	4 (musqusha, biyo raacint saxanka, goobta koloriinta lag diyaariyo)	1 (dibadda teendhada	1 (loogu talogalay biy raacinta baaldiga qashinka)	21
Weelal loog		2		2			

talogalay mila koloriin 0.2% ah (sid caadiga a weel 125 qaad)		(goobta milanka koloriinta)		(goobta diyaarinta koloriinta			